# Dhaqan Gelinta Gegida Dayuuradaha

Wax ka baro xuquuqda aad leedahay marka aad la dhaqmeyso ciidanka nabadgelyada ee gegida dayuuradaha.

**Waa noocee ciidamada nabadgelyada ee aad kula kulmi karto marka aad ka baxeyso Mareykanka?**

Xuduudda, waxa ay u badan tahay in aad la kulanto saraakiisha Ciidamada Ilaalada Xuduudaha iyo Gelitaanka (CBP), iyo saraakiisha Amniga ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha (HSI) Waaxda Socdaalka iyo Xoojinta Ilaalada Canshuuraha ((ICE)

**Haddii aan soo galayo Mareykanka oo warqadahaygu sax yihiin, askartu ma i joojin karaan oo i baari karaan?**

Guud ahaan, ciidamada ilaalada xuduudaha way joojin karaan dadka xuduuda ka soo galaya si ay u xaqiijiyaan in loo ogolaan karo Mareykanka iyo in kale, dadka alaabtoodana waxa ay ka baari karaan waxyaabaha aan la ogoleyn. Taasi waa dhab xitaa haddii aysan jirin wax laga shakiyo oo ku saabsan cafishka aad wadato. Dawladdu waxa ay aaminsan tahay in awoodda ay u leedahay in ay baarto alaabada qofka ay u ogolaaneyso in ay sidoo kale baaritaan ku sameyn karto qalabka elektarooniga ah ee qofka sida kombiyuutarada iyo telefoonada, laakiin sharci ahaan dood baa ka taagan. Saraakiishu kuguma sameyn karaan baaritaan iyaga oo kugu soo xushay diintaada, qowmiyadda aad ka soo jeedo, asalkaaga, jinsigaaga iyo waxyaabaha aad siyaasad ahaan aaminsan tahay.

**Saraakiisha xuduuddu ma i weydiin karaan sharciga aan waddanka ku joogo?**

Saraakiisha xuduuddu waxa ay awood u leeyihiin in ay ku weydiiyaan sharcigaaga si ay go’aan uga gaaraan in aad xaq u leedahay in laguu ogolaado in aad wadddanka geli karto iyo in kale. Haddii aad heysato dhalashada (baasaboorka) Mareykanka, waxaa lagaa doonayaa in aad ka jawaabto su’aalaha la xiriira aqoonsigaaga, inkastoo haddii aad diido in aad ka jawaabto su’aalaha la xiriira ujeedada safarkaaga ay keeni karto in aad ku daahdo baaritaanka. Haddii aad heysato sharciga deganaashaha rasmiga ah (LPR), waxaa lagaa doonayaa in aad ka jawaabto oo kaliya su’aalaha ku saabsan aqoonsigaaga iyo degenaashaha sharciga ah. Su’aalaha oo aad diido in aad ka jawaabto waxa ay keeni karaan dib u dhac, laakiin saraakiishu kuuma diidi karaan in aad soo gasho waddanka su’aalaha oo aadan ka jawaabin darteed. Haddii aad heysato dal ku gal, waa laguu diidi karaa in aad waddanka gasho haddii aad diido in aad ka jawaabto su’aalaha saraakiisha. Saraakiishu kuguma sameyn karaan baaritaan iyaga oo kugu soo xushay diintaada, qowmiyadda aad ka soo jeedo, asalkaaga, jinsigaaga iyo waxyaabaha aad siyaasad ahaan aaminsan tahay. Haddii lagugu wargeliyo in aadan geli karin waddanka oo aad ka cabsaneyso in jir dil ama maxkamadeyn laguu geysto haddii aad dib ugu noqoto waddankii aad ka soo safartay, waa in aad u sheegtaa saraakiisha xuduudda cabsidaada oo aad weydiisataa magan gelyo.

**Saraakiisha xuduudda ma i weydiin karaan su’aalo ku saabsan diinteyda iyo ra’yiga aan siyaasadda ka qabo?**

Qodobka Koowaad ee Dastuurka ayaa ilaaliyey xaqa qofku u leeyahay diintiisa iyo ra'yigiisa siyaasadda. Saraakiisha xuduuda wey weydiiyaan dadka diintooda mararka qaarkood iyo haddii ay koox diimeed gaar ah taageersan yihiin iyo ra'yiga ay siyaasadda ka qabaan.  Muslimiinta ayaa su'aalaha noocaas ah inta badan lala beegsadaa.  Su'aalaha ku saabsan diinta qofku aaminsan yahay iyo dhinaca uu u xagliyo siyaasadda iyo xuquuqda uu dastuurku u ogol yahay — lagama qaadin qofka marka uu joogo xuduudda. Haddii aad heysato dhalashada Mareykanka ama aad haysato deganaasho rasmi ah, khasab kuguma aha in aad ka jawaabto su'aalaha la xiriira diintaada iyo ra'yiga aad siyaasadda ka qabto, laguuma diidi karo in aad Mareykanka soo gasho sababta oo ah in aadan su'aalahaas ka jawaabin. Haddii saraakiishu ku adkeystaan in ay ku weydiiyaan su'aalahaas, waxa aad codsan kartaa in horjooge laguugu yeero.  Haddii aad tahay qof aan dhalashada heysan oo dal ku gal ku jooga ama booqanaya, waad diidi kartaa in aad ka jawaabto su'aalaha ku saabsan diintaada iyo dhinaca siyaasadda ee aad raacsan tahay, laakiin waxa ay taasi keeni kartaa in dib u dhac kugu yimaado ama lagu weydiiyo su'aalo dheeraad ah ama laguu diido in aad waddanka soo gasho. Haddii lagugu wargeliyo in aadan geli karin waddanka oo aad ka cabsaneyso in jir dil ama maxkamadeyn laguu geysto haddii aad dib ugu noqoto waddankii aad ka soo safartay, waa in aad u sheegtaa saraakiisha xuduudda cabsidaada oo aad weydiisataa magan gelyo.

**Ma khasab baa in sawir laga qaado farahayga marka aan soo galayo waddanka?**

Sawir ayaa laga qaadaa faraha dhamaan dadka sharci ku dagan ama booqanaya Mareykanka.

**Haddii la ii soo xulo wareysi dheeraad ah marka aan soo galayo Mareyanka, Maxaan yeeli karaa?**

Sharciga aad waddanka ku joogto ayey ku xiran tahay sida aad yeeleyso marka laguu soo xulo in lagu weydiiyo su'aalo dheeraad ah marka aad soo galeyso Mareykanka. Dadka heysta dhalashada (baasaboorka) Mareykanka xaq ayey u leeyihiin in ay soo galaan Mareykanka, haddii aad haysato dhalashada Mareykanka oo su'aalaha askarta ku weydiinayaan ay noqdaan kuwo qodqod ah, waad diidi kartaa in aad su'aalahaas ka jawaabto, laakiin waa in aad maanka ku heysaa in ay taasi dib u dhac kugu keeni karto iyo baaritaan dheeraad ah.  Sidoo kale dadka sharci rasmi ah ku deggan; inta badan laguuma diidi karo in aad Mareykanka soo gasho, laakiin waa in aad maanka ku heysaa in ay taasi dib u dhac kugu keeni karto iyo baaritaan dheeraad ah. Dadka aan heysan dhalashada ee heysta dal ku galka ama booqanaya waa loo diidi karaa in ay soo galaan haddii ay diidaan in ay ka jawaabaan.

Haddii su'aasha sarkaalku noqoto mid qodqod ah oo aan habooneyn, waa in aad ka gudbisaa cabasho oo horjeege la hadashaa.   (Sidoo kale dadka heysta dhalashada, sharci ku degan wadanka, ama heysta dal ku gal.)  Inkasta oo mowqifka CBP yahay in aadan xaq u laheyn qareen baaritaanka u horeeya iyo kan xiga, waxa aanu kugu dhiirigelineynaa in aad haysato telefoonka qareen ama hay'adaha adeegga sharciga oo aad weydiisato in ay kula soo xiriiraan haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada lagu xadgudbay ama lagu hayo muddo aad u dheer. Isku day kasta oo qofku doonayo inuu ku soo galo Mareykanka, haddii saraakiisha xuduuddu kuu sheegay in lagu xiray, ama ay cadaato in qofka lagu tuhunsan yahay inuu geystay fal dambiyeed, waxa aad codsan kartaa inaad la hadasho qareen inta aan su'aalo dheeraad ah lagu weydiin — haddii aad doonto waxa aad xaq u leedahay in aad iska aamusnaato, adiga oo codka ku dheereysanaya.

**Ma khasab ayey igu tahay inaan siiyo erayga sirta ah ee lagu furo kombiyuutarkayga ama telefoonkeyga saraakiisha xuduudda?**

Saraakiisha xuduudda waxa ay mararka qaarkood dadka safraya weydiiyaan in ay u sheegaan erayga sirta ee lagu galo kombiyuutarka marka ay soo galayaan Mareykanka. sharciga aad waddanka ku joogto ayey ku xiran tahay sida aad yeeleyso marka laguu soo xulo in lagu weydiiyo erayga sirta ah ee lagu galo qalabka aad wadato. Dadka haysta dhalashada Mareykanka looguma diidi karo in ay waddanka galaan haddii ay diidaan in ay bixiyaan erayga sirta ah ee lagu galo qalabka ay wataan. Diidmada waxa ay keeni kartaa inuu dibu dhac kugu yimaado, ama su'aalo dheeraad ah lagu weydiiyo ama saraakiishu qataan qalabkaas si ay ugu sameeyaan baaritaan dheeraad ah. Sidoo kale ayey u saameeneysaa dadka horey loogu ogolaaday in ay soo galaan Mareykanka oo haysta deganaashaha rasmiga ah welina dhaqangal yahay — lagama qaadi karo deganaashaha rasmiga ah iyada oo aan la horgeyn qaali. Wadamada aan looga baahneyn dal ku galka, waxa ay khatar ugu jiraan in loo diido in ay waddanka soo galaan haddii ay diidaan in ay bixiyaan erayga sirta, waana in ay ka fikiraan khatarta kaga iman karta haddii ay sidaas yeelaan. Hadii xafiiskaaga baaritaan lagu sameeyo oo lagaa qaato kombiyuutarkaaga ama telefoonkaaga, ka qaado cadeyn.

Xog dheeraad ah oo ku saabsan baaritaanka qalabka elektaroonigga ah, guji halkan: [https://www.aclu.org/blog/free-future/can-border-agents-search-your-electronic-devices-its-complicated](https://www.aclu.org/blog/free-future/can-border-agents-search-your-electronic-devices-its-complicated)

**Maxaa dhacaya haddii la ii soo xulo jirkeyga baaritaan lagu sameeyo?**

Qofka oo jirkiisa la baaro kama mid aha baaritaanka gegidda dayuuradaha. Waa in ay jirtaa "tuhun macquul" ah waana in meel qarsoodi ah lagu sameeyaa.

**Waa noocee ciidamada iyo saraakiisha kale ee dawladda ee ka qeyb qaata nidaamka baaritaanka ee gegidda dayuuradaha?**

Gegida diyaaradaha, Saraakiisha Maamulka Amaanka Gaadiidka (TSA) ayaa mas'uul ka ah baaritaanka rakaabka. Inta badan saraakiisha TSA kama tirsana ciidanka nabadgelyada, doorkooduna waa in ay baaraan rakaabka, cafashka iyo xamuulka. Baarayaasha TSA waa ay baari karaan adiga iyo cafashkaaga gegida diyaaradaha, laakiin kuma xiri karaan. Saraakiisha kale ee ciidanka nabadgelyada, sida booliiska gegida diyaaradaha ayaa jooga gegida dayuuradaha.

**Baaritaan aniga iyo cafashkayga ma lagu sameyn karaa ka dib marka aan dhex maro makiinadda biraha sheegta oo ay arkaan in aanan boorsada ku wadan wax hub ah?**

Haa. Haddii xitaa baaritaanka ugu horeeya ee cafashkaaga ee TSA aan wax laga shakiyo lagu arag, baarayaashu waxa ay awood u leeyihiin in ay adiga iyo cafashkaaga ku sameeyaan baaritaan dheeraad ah. Saraakiishu kuguma sameyn karaan baaritaan iyaga oo kugu soo xushay diintaada, qowmiyadda aad ka soo jeedo, asalkaaga, jinsigaaga iyo waxyaabaha aad siyaasad ahaan aaminsan tahay.

**Maxaa dhacay haddii madaxu ii daboolan yahay diinteyda darteed oo amaanka gegida dayuuradaha ii soo xulo baaritaan dheeraad ah?**

Xaq waxa aad u leedahay in aad madaxa daboolan karto sida diintaadu ku fareyso. Waa in aad ku adkeysataa xaqa aad u leedahay in aad xirato madax gashi haddii lagu weydiisto in aad iska furto inta aad dhex mareyso gegida diyaaradaha. Haddii makiinaddu qeyliso, waxaa laga yaabaa in saraakiishu ku weydiistaan in aad marto baaritaan dheeraad ah. Waxaa suurogal ah in ay gacanta geliyaan marada

maxada kuugu xiran ee diintaadu ku fareyso ama lagaa codsado in aad furto. Waxa aad codsan kartaa in ay gacanta ku baaraan ama aad furto iyada oo qof kugu jinsi ah kula joogo oo lagu geeyo meel qarsoon.

Haddii aadan dooneyn in saraakiisha TSA taabtaan marada madaxa kuugu xiran, waa in aad diidaa oo aad u sheegtaa in aad adigu fureyso marada madaxa kuu xiran. Dhinac ayaa laguu istaajinayaa, sarkaal ka tirsan TSA ayaa ku eegaya adiga oo furaya madaxa kuu xiran. Marka aad furto, sarkaalka TSA ka tirsan ayaa gacanta marinaya suuf yar kaasoo la gelinayo makiinad si uu u tijaabiyo in wax kiimiko ah ku jiraan. Haddii aanu baaritaanka waxba sheegin, waa laguu ogolaanayaa inaad safarka sii wadato. Haddii sarkaalka TSA ku adkeysto in aad furto madaxa kuu xiran diintaadu ku fareyso, waxa aad xaq u leedahay in meel qarsoodi ah lagu geeyo. Saraakiishu ma sameyn karaan baaritaan dheeraad ah oo ku saleysan diintaada, halka uu qofku ka soo jeedo asal ahaan, diintaada, jinsigaaga, qowmiyadaada, ama waxyaabaha aad aamisan tahay.

**Maxaa dhacaya haddii ay caruur ila socdaan?**

Waxa aad codsan kartaa in ilmahaaga laga daayo baaritaanka gegida diyaaradaha. Hase yeeshee, ma jiro wax ka reebaya ilmaha baaritaanka jirka ee caruurta. Ilmaha 13 sano ka yar way iska qabi karaan kabahooda, jaakad fudud, iyo duubka madaxa marka ay marayaan baritaanka.

**Maxaa dhacaya haddii aan wato caanaha naaska ama caanaha ilmaha?**

Waalidka iyo kuwa caruurta korinaya ee dhoofaya iyaga oo caruur la socdaan ama aanay la socon waa loo ogol yahay in ay qaadan karaan caanaha naasaha laga liso iyo caanaha caruurta (baraf iyo waxyaabaha kale ee la doonayo si loo qaboojiyo canaha naaska ama caruurta) waxka badan 3 waqiyadood, marba haddii aad wergeliso saraakiisha marka aad timaado gegida diyaaradaha. Marka aad wadato caanaha laga liso naaska ama kuwa caruurta oo dhex mareyso makiinadaha waa la baarayaa. Saraakiisha TSA waxaa laga yaabaa in ay tijaabiyaan dareeraha in ay yihiin waxyaabaha qarxa. Waxaa laga yaabaa in saraakiisha TSA ku weydiiyaan in aad furto weelka ay ku jiraan dareeraha. Caanaha laga liso naasaha iyo caanaha caruurta, iyo waxyaabaha kale ee dareera sida biyaha iyo kareemada waxaa laga yaabaa in la raaciyo cafashkaaga oo diyaaradda lagu daro.

**Haddii aan saaranahay diyaaradda, shaqaalaha diyaaradda su'aalo ma i weydiin karaan oo ma iga dajin karaan diyaaradda?**

Waxaa laga yaabaa in dulliyaha diyaaradda uu diido karo inuu qof rakaab ah diyaaradda raaco hadii ay jirto sababa la rumeysan karo, in rakaabkaasu khatar ku yahay duulimaadka. Hase yeeshee, duuliyaha su'aal kuma weydiin karo mana diidi karo inuu rakaab raaco duulimaadka taasoo ay ugu wacan tahay waxyaabo laga aamisan yahay oo ay ka mid tahay diinta, qowmiyadda, jinsiga, halka uu qofku ka soo jeedo asal ahaan iyo waxyaabaha uu siyaasadda ka aamisan yahay.

**Maxaan yeelayaa haddii ay su'aalo i weydiiyaan ciidanka nabadgelyada mar kasta oo aan hawada ku safro ama aan ka shakisanahay in aan ku jiro liiska qaranka ee dadka aan "duulimaadka loo ogoleyn "?**

Haddii aad aaminsan tahay in liiska si khalad ah laguugu daray, waa in aad la xiriirtaa barnaamijka TSA oo weydiisaa Traveler Redress Inquiry Program. Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa: here. Haddii aad is aaminsan tahay in ay jirto sabab magacaaga loogu daray liiska, waa in aad la tashataa qareen.